SHARCI LR. 75
OGGOLAANSHAHA SHARCIGA GUDDIGA
XUDUUDAHA IYO FEDERAALKA

TAARIIKH: 31/12/2014

MADAXWEYNAHA J.F.S,

Markuu Arkay: Qodobka 87aad, Xarafka ' C ' iyo Qodobka 90aad, Xarafka 'F' ee Dastuurka J.FS.

Markuu Arkay: Qodobka 49aad iyo Qodobka 111E ee Dastuurkka KMG ee J.F.S

Markuu Arkay: Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka ee ku saasan Ansaxinta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka Lr. 543/3/1/9/14 ee 22/12/2014.

Wuxuu soo saaray Sharcigan:

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo Maalinta uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed Saxiixo Xeerkaan, waxa uu Madaxwaynuhu oggolaaday Ansaxinta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed

**Qodobka 2aad.**

Waxa uu Sharcigan dhaqangelayaa maalinta uu Madaxwaynuhu Saxiixo waxaana lagu soo saarayaaFaafintaRasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 31/12/2014

XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO. HAN/078/20[illegible]
TAARIIKH 20/1/2015
SAXIIXA NO.

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Madaxweynaha J.F.S**
**Mudane Xasan Sheekh Maxamuud**

**Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Ref:** 543/3/1/9/14:الرقم

**Mogadishu,** 22nd December 2014 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

---

Og: Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka
Muqdisho.

---

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

---

Og: Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga Qaranka
L/H. Golaha Shacabka.

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

---

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

---

Ujeeddo: Ansixinta Hindise Sharciyeedka Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka.

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kuugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Hindise Sharciyeedka Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 5aad ee fadhigiisii 21aad taariikhda markay aheyd 21ka Diseembar 2014 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 129 (Boqol Labaatan iyo Sagaal Xildhibaan).
- Xildhibaan diidey: 13 (Toban iyo Seddex Xildhibaan).
- Xildhibaan ka aamustay 3 (Seddex Xildhibaan).

Tell: +252 612224441/ +252 616312787

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafqsan Qodobada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

*MJ/AM*

**Tell: +252 612224441/ +252 616312787**

# ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA GUDDIGA XUDUUDAHA IYO FEDERAALKA

| Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 145: Oggol (129). Diidmo (13). ka aamustay (3). | |
| Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari" | Taariikh: 22nd December 2014 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar | Taariikh: 22nd December 2014 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: 22nd December 2014 |

GOLAHA SHACABKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA · THE HOUSE OF PEOPLE THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · OFFICE OF THE SPEAKER · XAFIISKA GUDDOOMIYAHA

REPUBLIC FEDERAL OF SOMALIA
Federal Parliament
Committee of Interior Affairs, Regional Administration & National Security

جمهورية الصومال الفيدرالية
البرلمان الفيدرالي
لجنة الشؤون الداخلية،إدارة الاقاليم
و الأمن القومي

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**
**Baarlamaanka Federaalka Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulka Gobollada & amniga Qaranka.**

---

Ref: GAGMGA /94/2014 Date: 21st Dec, 2014

Ku: Guddoomiyaha Golaha shacabka JFS = muqdisho
Og: Xubnaha Golaha Shacabka J. F.Soomaaliya =Muqdiso
Ujeeddo: Warbixinta Guddiga ee Hindise Sharciyeedka Xuduudaha iyo Federaalka

(2) c/gove - Soo diyaan Gudbinta MJFS: = oggol 129 = Diiday 13 = Aamus 3 codeysay 145

**Mudane Guddoomiye,**

Gudiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada, iyo Amniga Qaranka wuxuu dib u eegis ku sameynaya Hindise sharciyeeka kor ku xusan.

kadib talooyinkii xildhibaanada sharafta leh iyo waafaqsanaata Dastuurka dalka

,Hadaba Mudaneyaal maalintii Sabtida ee 20/12/2014 waxaan isku waafaqnay in wax laga badalo Qob,4aad farqadiisa 1(a. b.c. d. g.) iyo isla Qob,4 farqada 2aad (g) iyo 17aad farqada (2) in laga reebo xadudeeynta Degmoyinka iyo Gobollada waana ka saarnay anagoo tixgilineeyno soo jeedintina iyo Aqbalaada Guddoomiyaha golaha shacabka anngoo ka eegeenay waafaqsanaanta shuruucda dalka.

21/12/14

Mudaneyaal waxaa lagama maarmaan ah in sharcigaan uu helo taagyeeradiina buuxda si loo dhiso Guddigii nidaamin lahaa qaabka dhismeedka Jamhuuriyad Federaal ah si waafsan Dastuurka.

Ugu dambaynti mudanayaal Waxaan talo ku bixinenaa hadaan nahay GuddigaArrimaha Gudaha iyo amniga in aad siisaan codkiina sharcigaan oo horay golaha dib u celiyay.

**Mahadsanid :**

**XIL. Fowziya Maxamed Sheekh**

**Guddoomiyaha guddiga Arrimaha gudaha iyoAmniga Qaranka ee Baarlamaanka**

(1) Nuqulka Rasmiga Ah oo la codeeyey

FEDERAALKA SOOMAALIYA / REPUBLIC OF SOMALIA

No: 1375
Tr: 21/12/2014
SAXIIX:

REPUPLIC FEDERAL OF SOMALIA
Federal Parliament
Committee of Interior Affairs, Regional Administration & National Security

جمهورية الصومال الفيدرالية
البرلمان الفيدرالي
لجنة الشؤون الداخلية،إدارة الاقاليم
و الأمن القومي

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
Baarlamaanka Federaalka Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamulka Gobollada & amniga Qaranka.

Ref: GAGMGA

Date:

1. Fowsiyo Maxaxamed Sheikh (Guddomiye)
2. Dahir Amin Jesow (Guddomiye k/xegen)
3. Maxamed Maxamud Gurxan (Xogheye)
4. Cumar Maxamud Maxamed (C finish)
5. Cabdirashiid Maxamed Xidig
6. Cabdinasir Gaarane Cumar
7. Maxamed Cumar Ceymooy
8. Seynab Maxamed Caamir
9. Maxamed Cabdulaahi Xasan (Fadhayo)
10. Cali Aadan Xussein ( Ali Aylam)
11. Cabdiwili Ibraahim Muudey
12. Axmed Ismaciil Maxamed
13. Sh Aadan maxamed Nuur (A. madoowe)
14. Maxamed Cabdullahi Farax (geesey)
15. Abdixakiim Cige Guulled
16. Cabdiqadir Cali Cumar
17. Cabdullahi Yuusuf xasan (Alakeey)

Ossol. 129
Dricley 13
Aamus: 3

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 533 /25/1 /9/14 :الرقم

Mogadishu, 2nd December, 2014 التاريخ

Ku: Xildhibaanada Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka

------------------------------------------

Ujeeddo: Soo Gudbin Hindiseyaal Sharci

Mudanayaal,

Waxaan halkaan idinkugu soo gudbinaynaa Hindiseyaasha Sharci oo naga soo gaaray Xafiiska R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, warqadda summadeedu tahay XRW/GB/00.232/11/14, kuna Taariikheysan 18/11/2014, ujeedkeeduna ahaa soo gudbin Hindise sharciyeedka Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka, sidoo kale warqadda sumadeedu tahay XRW/GB/00.341/11/14 ,kuna Taariikheysan 18/11/2014 ujeedkeeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedka Guddiga Qaranka Madax-bannaan ee Doorashooyinka .

Xildhibaanada waxaa laga codsanayaa inay soo akhristaan, waxaana dhowaan Hindiseyaashan la soo gelin doonaa ajendaha Golaha si ay u galaan akhrinta koowaad.

Naga guddooma salaan diiran iyo qaddarin.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Tell: +252 612224441/ +252 616312787
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جـمـهـوريـة الصـومـال
الحكومة الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

*The Federal Government of the Somali Republic*
Office of the Prime Minister

**Ref: XRW/GB/00. 232 /11/14** **Taariikh:** 18/11/2014

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha JFS =Muqdisho=

Ujeeddo: **Soo Gudbin 'Hindise-sharciyeedka Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka'**

Mudane Guddoomiye,

Tixraac go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.56.11.14** ee **18/11/2014**, kuna saabsanaa ansixinta **'Hindise-sharciyeedka Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka'** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Haddaba, Mudane Guddoomiye, waxaan halkan idinkugu soo gudbinaynaa **'Hindise-sharciyeedka Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuduudaha iyo Federaalka'** si aad uga gudataan xilkiina Dastuuriga ah.

Waxaan idinka codsanaynaa in aad fududaysaan ansixinta Hindise-sharciyeedkan maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintiisa.

Naga guddooma salaan diirran.

Dr Cabdiweli Sh. Axmed Maxamed
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

THE FEDERAL GOVERNMENT ★ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ★ OFFICE OF THE PRIME MINISTER ★ OF THE SOMALI REPUBLIC

+252-61-655 1133 +252-61-700 1995 E-mail: pm@opm.gov.so Mogadishu, Somalia

JAMHUURIYADDA FED. SOOMAALIYA
GOLAHA SHACABKA
SOO GELID
NO: 1324
TR: 29-11-14

Jamhuuriyadda Soomaaliya
**Xukuumadda Federaalka**
**Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Federaalka**
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال
الحكومة الفيدرالية
وزارة الشؤن الداخلية و الفيدرالية
مكتب الوزير

Somali Republic
**Federal Government**
**Ministry of Interior & Federal Affairs**
**Office of the Minister**

---

**Ref: WAG&F/XW/000317/14** **Date: September 14, 2014**

*Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda FS* *"Muqdisho"*
*Og: Guddiga Golaha Wasiirada ee Hindise Sharciyeedyada* *"Muqdisho"*

*Ujeeddo:- Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Dhisidda Guddiga Xuduudaha iyo Federaaleynta.*

*Mudane Ra'iisul Wasaare,*

*Salaan kadib, waxaan halkaan si xushmad iyo qadarin leh kuugu soo gudbinaynaa Hindise Sharciyeedka Dhisidda Guddiga Xuduudaha iyo Federaaleynta oo horay Baarlamaanka noogu soo celiyey, si looga ansixiyo Golaha Wasiirada kadibna loogu gudbiyo Golaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.*

*Mudane Ra'iisul Wasaare, sida aad la socotaba, Dalku wuxuu ku jiraa xilligii dib u habeynta iyo hirgelinta Arrimaha Federaalka maadaama ay dhismayaan Maamul Gobolleedyo KMG ah taasoo keeni karta muran Xuduudeed, sidaas darteed, Mudane Ra'iisul Wasaare, waxaan codsanaynaa in naloo fududeeyo anxisinta Hindise Sharciyeedkan si waajibaadka Xukuumaddu u idmatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka u gudato.*

*Wada Shaqeyn Wacan*

A. G. [signature] B.

***Md. Xildh. Cabdullaahi Goodax Barre***
***Wasiirka Wasaaradda***

Mahdi
Hor Cn Badiyo
1/12/14

************************************************************************

*Address: Via-Tanzania, 888 Building.*
*Tel: +252-6 18454082/ +252-69444447 Email: godah@mifa.gov.so or goodah@yahoo.com Mogadishu-Somalia*

**SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA XUDUUDAHA IYO FEDERAALKA**

## Cutubka 1: Qodobada Guud

### Qodobka 1aad

### Ujeedada Sharciga

1. Sharcigan Waxaa lagu dhisay Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka si waafaqsan Qodobada 49 iyo 111E ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka marka uu gudanayo xilkiisa waa ka madaxbannaan yahay awoodaha laanta fullinta iyo hay'ad kasta oo kale wuxuuna u hogaansamayaa oo keliya Dastuurka iyo sharciga.marka laga reebo korjoogtenta iyo la xisaabtanka Golaha baarlamaanka JFS.
3. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu u xil saaran yahay :
    a) In uu Xaqiijiyo madax-bannaanida iyo dhexdhexaadnimada siyaasadeed talana siiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed dhisidda xuduudaha xubnaha Dawladdaha ka tirsan Federaalka iyo maamullada Gobolada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
    b) Inuu taageero wax ka bedelka deegaanada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed si loo gaarsiiyo dalka nidaam federali dhameystiran oo ay ku dhan yihiin dhammaan xubnaha ka tirsan federaalka.

### Qodobka 2aad
### Maqaam Sharciyeedka Guddiga

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu leeyahay shakhsi qaanuuni ah oo uu ku gudan karo waajibaadkiisa shaqo ee sharcigani u ogolaanayo.
2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu sameysanayaa shaabadda iyo astaanta u gaarka ah.

### Qodobka 3aad
### Xaruunta Guddiga

1. Xaruunta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waa Muqdishu, Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu hawlahiisa ku qabsan karaa meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. sida dhageysiga dacwadaha, cabashooyinka ama daruufi ku kalifto

## Qodobka 4aad
## Xilalka iyo Awoodaha Guddiga

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxuu leeyahay xilalka iyo awoodaha soo socda:
   a) In uu sameeyo daraasaad ku saabsan kala xulashada nidaamka ku haboon sidii loo soohdimeeyn lahaa xuduudaha maamul Goboleedyada iyo sidii loo dhisi lahaa dawladaha xubanaha ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   b) In uu sameyo dhageysi dadweyne iyo mid xeel dheerayaal ama uu qabto kulamo ku saabsan soohdimeynta xuduudaha Maamulgoboleedyada;
   c) Inuu booqashooyin ku sameyo goobaha si uu ula tashado shacabka deegaanadda khuseeya soohdimeynta xuduudaha maamulgoboleedyada iyo qaab dhismeedka dawladaha xubnaha ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   d) Inuu sameyo hawlgal nakhshadeyn ah oo ku saabsan astaameeynta xuduudaha ,Maamul-goboleedyada iyo qaab dhismeedka Dawladaha xubnaha ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya hadba sida guddigu u arkay lagama maarmaan;
   e) In uu aruuriyo fikradaha goboladda horay u jiray kana diyaariyo warbixin habka ugu wanaagsan ee ay midoobi karaan si ay uga mid noqdaan xubin dawladda federalka, iyadoo maanka lagu hayo heshiisyada jira iyo wada hadalda u dhexeeya gobolada sida haboon;
   f) Inuu latashado talana uu siiyo maamul goboleedyada hada jira ama degmooyin ama nidamaanka xukuumad goboleed go'aan uga gaari laheyd habkii ugu biiri lahaayeen Maamul Goboleed ama maamul goboleedyo hore u jiray si ay xubin uga noqdaan dawladda federaalka;
   g) Inuu Baarlamaanka Fedraalka uu soojeediyo talooyin ku saabsan arimaha soohdimeynta xaduudaha muumul-goboleedyada iyo dawladaha xubnaha ka noqonaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
   h) In uu fulliyo wixii kale hawl ah uu sharciga ama Dastuurka u xilsaaro.

2. Guddiga xuduudaha iyo Federaalka wuxuu hawl gelin karaan xeel dheerayaal qaran ama caalami oo leh khibrad lahubo dhanka soohdimeeynta xuduudo maamulgoboladka ee dalka gudihiisa hadba sida ugu habboon ee Guddigu u arko lagama maarmaan.

## Qodobka 5aad
## Habraaca Magacaabista

1) Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka waa inuu mudo 30 maalmood gudohood a ah ka bilaabata taariikhda sharcigaan dhaqaangalo , ka dib la tashiyo lala yeeshay qeebaha Gobolada oo ay ku jiraan Maamul Goboledyada ku meel gaarka ah, u gudbiyaa Golaha wasiirada liiska musharixiinta si looga xusho sagaal xubnood sida waa faqsan Dastuurka KMG, kuwaas oo noqonaya xubnaha guddiga Xuduudaha Federaalka .
2) Golaha Wasiirda mudo sodon maalmood ( 30 ) gudahood waxay Golaha Shacabka usoo gubniyaan sagaal musharax oo ay soo ansixyeen in ay noqdaan xubnaha Guddiga xuduudaha iyo Federaalka ee ku xusan , faqradda (1) ee Qodobkan.Federaalka
3) Sodon maalmood gudohood (30) , ka bilaabata marka la horkeeno , Golaha Shacabka magacyada musharixiinta, ,kadib marka uu kasoo baaraandego guddiga arimaha Gudaha, Maamuladda Gobollada, Federaalka iyo amniga qaranka wuxuu Goluhu dhageysanayaa musharixiinta si uu u tixgeliyo aqoontooda, waayo aragnimadooda iyo aragtidooda fog ay ku tiigsanayaan jagada xubinimada Guddiga xuduudaha iyo Federaalka
4) Marka uu dhammaado dhegeysiga Musharaxiinta ee ku xusan Farqadda (3) ee Qodobkan, Golaha Shacabka wuxuu xubin kasta oo la soo magacaabay ku ogolaanayaa cod hal dheeri ah xubnaha Golaha fadhiya.
5) Haddii hal musharax ama ka badan la diido sida ku xusan Farqadda (4) ee Qodobkan, waa in lagu soo buuxiyaa habraaca ku xusan Faqraddaha ( 1, 2,3,4) ee Qodobkan.
6) Mar hadii Golaha Shacabka soo ansixiyo sagaalka musharax sidaa ku xusan Faqradaha (3) ilaa (5) ee Qodobkan, Madaxweynaha JFS wuxuu soddon maalmood (30) gudehood si rasmi ah ugu soo magacaabayaa xubnahan in ay noqdaan xubnaha Guddiga xuduudaha iyo Federaalka.
7) Si loo dhawro miisaanka jinsiga laba ( 2) ka mid ah 9 (sagaalka) xubnood ee Guddiga lamagacaabayo waa in ay dumar noqdaan.

**Qodobada 6aad**
**Shuruudaha ka mid noqoshada Guddiga**

1. Dhammaan dadka lagu magacabay habraaca ku xusan Qodobada 5aad ee Sharcigan waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:
    a. Waa in uu yahay muwaadin Soomaali ah;
    b. Waa in ay da'diisa ka yarayn 40 jir;
    c. Waa in uu leeyahay caafimaad wanaagsan oo u suurtogelinaya gudashada waajibaadkiisa;
    d. Waa in uu haystaa shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay ama uu leeyahay waayo-aragnimo la xiriirta maamulka Xuduudaha deegaanada iyo Federaalka
    e. Waa in taarikh-nololeedkiisu ka maran yahay sumcad xumo shakhsiyadiisa wax u dhimi karta ama su'aallo ka keeni karta hufnaantiisa iyo daahfurnaantiisa;
2. Sida uu qabo Qodobka 111E (4) ee Dastuurka sida ku-meel-gaarka loo ansixiyay, Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka guud ahaan waa in uu madaxbannaan yahay, dhexdhexaad yahay, matalaa qaybaha deegaanada Soomaaliya oo dhan, loona dhan yahay.

**Qodobka 7aad**
**Qaab-dhismeedka Guddiga**

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:
    a. Guddoomiye;
    b. Guddoomiye Ku-xigeen;
    c. Xoghayaha Guddiga; iyo
    d. Lix (6) xubnood oo kale.
2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu xubnihiisa ka dhex dooranaya Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xoghaye kasoo kulankiisa ugu horeeya shir-guddominaya xubinta ugu da'da weyn.
3. Guddoomiyaha waa Madaxa Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuuna masúul ka yahay arrimaha soo socda:
    a. Isugu yeeridda iyo Guddoominta shirarka Guddiga;
    b. Hagidda iyo u kuurgelidda hawlaha Xoghaynta Guddiga;
    c. Xoojinta iyo joogteynta xiriirka shaqo ee kala dhexeeya Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka,Baarlamaaka Federaalka ,Hay'adaha kale ee Qaranka ee ay khuseeyaan arrimaha maamulada degmooyinka iyo gobolada;
    d. U kuurgelidda daraasado cilmi baaris, xog raadin iyo hawlaha la xiriira latashiyo sida lagu qeexay sharcigan: iyo

e. Fulinta wixii waajibaad kale ah ee uu sharciga u xilsaaro.

4. Guddoomiye Ku-xigeenka wuxuu masúul ka yahay arrimaha soo socda:
   a) Hawl kasta oo uu u xilsaaro Guddoomiyaha Guddiga:
   b) Inuu qabto hawsha iyo waajibaadka Guddoomiyaha Guddiga marka uu maqan yahay ama ay ku timaado Xaalad xil-gudasho la'aan joogta ah; iyo
   c) Hawl kasta oo kale oo uu u xilsaaro Dastuurka ama Sharciga.

5. Xoghayaha Guddigu wuxuu mas'uul ka yahay arrimaha soo socda:
   a) Waa madaxa maamulka Guddiga mas'uulna ka ah hagidda hawlaha xoghaynta;
   b) Xoghayaha Guddiga wuxuu noqonayaa madaxa xogheeynta isla markaana amraya hawalaha xogheeynta si waafaqsan habraacyada iyo sharciga;
   c) Xoghayaha wuxuu mas'uul ka yahay hawl qabadka maamulka ee guddiga Xuduudaha iyo Federaalka oo ay ka mid yihiin:-
      (i) Fulinta wixii waajibaad ah ee uu Guddiga u xilsaaro; iyo
      (ii) Fulinta wixii waajibaad kale ah ee uu u xilsaaro Dastuurka iyo sharcigan.

## Qodobka 8aad
## Xogheynta Guddiga

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu yeelanayaa Xogheyn iyo hawl-wadeenada maamul oo laga maarmaan u ah fulinta hawlahooda kuwaas oo lagu soo qorayo si waafaqsan sharciga shaqaalaha rayidka.
2. Xoghaynta Guddiga waxay mas'uul ka yihiin:

   a) Hawl-Maalmeedka Guddiga iyo kormeerka hawl-qabadka hawlwadeenada Maamulka Guddiga oo aan ku jirin xubnaha ku xusan Qodobka 7aad ee sharcigan;
   b) Diyaarinta kulamada iyo hawlaha Guddiga hadba sidduu Guddoomiyaha ama Xoghayaha Guddiga u faro;
   c) Diyaarinta iyo qaban-qaabinta safarada hadba sida uu Guddoomiyaha ama Xoghayaha u faro;
   d) Kaydinta maxdar-qoraalada kulamada Guddiga iyo dokumintiyada kale;
   e) La xiriirka Xukuumadda Federaalka, MaamulladaGobollada eejira, Khuburada, Marqaatiyaasha, Wakiilada deegaannada iyo shaqsiyaadka ama hay'adaha kale ee muhiimkaah, hadba sida uu Guddoomiyaha ama Xoghayaha Guddiguuu faro;
   f) Inuu qabto hawlo kale ee uu faro Guddoomiyaha ama Xoghayaha

## Qodobka 9aad
## Kulamada Guddiga:

1. Guddiga xuduudaha iyo Federaalka wuxuu yeelanayaa Kulamo caadi ah ugu yaraan bishiiba mar;
2. Haddii shan xubnood oo ka tirsan Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka ay codsadaan kulan aan caadi ahayn, Guddoomiyuhu wuxuu isugu yeerayaa kulan aan caadi ahayn;
3. Dhammaan kulamada Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka, waxaa shir Guddoominaya Guddoomiyaha, marka uu maqan yahayna Guddoomiye ku-xigeenka; iyo
4. Haddii Guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa ay maqan yihiin, xubnaha jooga waxay cod aqbaliyad ku dooranayaa shir Guddoomiye ku meel gaar ah si uu u shir guddoomiyo kulanka;

## Qodobka 10aad
## Muddada Xil-heynta Guddiga

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxaa loo dhisay muddo ku jaan go'an madasha Baarlamaanka Federaalka oo xiligiisa dhammaanayo August 2016;
2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu u soo gudbinayaa talooyinkiisa ku saabsan soohdimooyinka Xuduudaha Maamul-goboleedyada iyo qaab dhismeedka dowladaha Xubnaha ka ah Federaalka ka hor dabayaaqada December 2015;
3. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka kadib marka uu u soo gudbiyo talooyinkiisa Baarlamaanka Federaalka, Guddigu wuxuu sii haynayaa Xilka ilaa iyo inta ay ka dhammaaneyso mudo xiliyeedka August 2016, taasoo loogu tala galay inuu ku soogabagabeeyo warbixinta hawl-qabadkiisa diyaarna u ahaado wixii su'aalo weydiin ah ee Golaha Shacabka uga yimaada.

## Qodobka 11aad
## Waayidda Xubinnimadda Guddiga

1. Xubinnimadda Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxaa lagu waayi karaa arrimaha soo socda:

   a) Marka xubinta ay ku timaado geeri;
   b) Marka uu xubinta go'aansado inuu iska casilo isagoo bixinaaya bil ka hor ogeeysiin qoraal ah oo ku saabsan casilaadiisa;
   c) Marka xubinta lagu helo dembi ku saabsan faldembiyeed uu galay kaas oo gaarsiisan xukun Maxkamadeed;
   d) Marka xubinta ay ka soo qeybgeliweydo lix kulan oo isku xigta ee guddiga isagoo wax cudurdaar ah u soo gudbin guddoomiyaha; ama xoghayaha;
   e) Hadii ay ku timaado xaalad caafimaad oo xilkiisa la gudan waayo.

2. Kadib marka xubinta ay weydo xubinimadda, todobo maalmood gudohood sida ku xusan Farqadda 1aad ee Qodobkan, Guddoomiyaha guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu wargelinayaa Baarlamaanka Federaalka iyo Xukuumadda si loo soo buuxiyo xubintaas si waafaqsan Qodobka 5aad ee Sharcigan.

### Qodobka 12aad
### Xassaanadda Xubnaha Guddiga iyo Hay'adda

1. Dhismooyinka iyo xafiisyada Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka lama baari karo iyadoo ogolaansho laga haysan Maxkamadda Sare ee Federaalka.
2. Xubnaha, Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka laguma soo oogi karo dacwad la xirriirta hawl-gudashadooda,haddii uu sharciga ku xadgudbin

## Cutubka 3aad: Xeer-hoosaadka Guddiga

### Qodobka 13aad
### Habraaca Go'aan gaarista

1. Guntanka kulanka Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu ku ansaxayaa shan (5) xubnood.
2. Guddigu wuxuu go'aankiisa ku gaarayaa cod aqlabiyad ah ee tirada guud ee xubnaha Guddiga.
3. Hadii codadka isla eekaadaan waxaa la raacayaa dhinaca uu Guddoomiyaha u codeeyo.

### Qodobka 14aad
### Hawlaha Cilmi Baarista ee Guddiga

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu iskiisa u sameysan karaa cilmi baaris ama uu u wakiilan karaa xubno ka tirsan Guddiga si ay u sameeyaan daraasaad gaar ah oo ku saabsan su'aalo la xiriira waajibaadka hawlihiisa.
2. Xogheynta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka isagoo ka amar-qaadanaya Guddoomiyaha ama Xoghayaha Guddiga si uu u siiyo xubnaha loo igmaday inay sameeyaan daraasad wax alaale wixii taakuleyn ee suurtagal ah si ay u gutaan hawlaha loo xilsaaray.
3. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxay shaqaaleysan karaan xeel dheerayaal si ay u qabtaan daraasado gaar ah oo ku saabsan su'aalo la xiriira hawlaha iyo waajibaadka Guddiga taasoo miisaaniyadiisa Guddigu ansixiyo.

## Qodobka 15aad
## Dhageysiga Dadweynaha, khubarada iyo Markhaatiyaasha

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxay qaban karaan dhageysiyo dadweyne,khubaro iyo markhaatiyaal si ay u helaan xog iyo talooyin ku saabsan arrimola xiriira hawlaha iyo waajibaadka Guddiga;
2. Waxaa diyaarinaya dhegeysiyada dadweyne ee ku xusan Faqradda 1aad ee Qodobkan Xogheynta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka isagoo ka amar qaadanaya Guddoomiyaha ama Xoghayaha Guddiga;
3. Dawladda Federaalka, Maamul-goboleed, Gobollada iyo Degmooyinka waa in ay gacan ku siiyaan gudashada waajibaadkiisa ku qeexan Faqradda 1aad iyo 2aad ee Qodobkan;
4. Guddigu waa in uu si dheelitiran gobolada dalka uga fuliyaa dhageysiga iyo latashiga dadweynaha,khubarada iyo marqatiyaasha si Waafaqsan Qodobkan.

## Qodobka 16aad
## La kulanka Bulshada deegaannada

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu la kulmayaa bulshada deegaanadaas si uu u helo afkaartooda hadba sida ay u doorbidayaan soohdimeynta Xuduudaha maamulgoboleedyada iyo dhisidda Xubnaha ka tirsan Dawladda Federaalka;
2. Xogheeynta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka isagoo ka amar qaadanaya Gudoomiyaha ama Xoghayaha Guddiga wuxuu abaabulayaa uuna diyaarinayaa safaradda lagama maarmaanka u ah la kulanka deegannada;
3. Dawladda Federaalka, Maamul-goboleed, Gobollada iyo Degmooyinka in ay gacan ku siiyaan Guddiga gudashada waajibaadkiisa ku qeexan Faqradda 1aad iyo 2aad ee Qodobkan.

## Qodobka 17aad
## Soo Gudbinta Talooyinka Guddiga

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu u soo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka talooyinkiisa la xiriira xog-helidda, cilmi barista iyo hawlaha la tashiga ay sameeyeen mudadda ay xilka haayeen si waafaqsan nidaamka Dastuurka sida KMG loo ansixiyay iyo Sharcigan;
2. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka wuxuu u soo gudbiyaan Baarlamaanka Federaalka talooyinkooda ku saabsan sooh dimeynta Xuduudaha,maamul-goboleedyadda iyo dhisidda Dawladdaha xubin ka noqonaya Federaalka ugu dambeyn Diseembar 2015;
3. Tala soo jeedinta Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka ee ku xusan faqradda (2) ee qodobkan waa inay ku salaysnaato ujeeddada nidaamka federaalka iyo shuruudaha lagu dhisayo Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka si waafaqsan Dastuurka sida KMG ah iyo sharcigan.

## Qodobka 18aad
## Ujeedooyinka Nidaamka Federaalka

1. Ujeeddooyinka loo dhisayo nidaamka Federaalka Soomaaliya waa sida soo socoto:
   a) Si waafaqsan Qodobka 50 (a) ee Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyay ujeedada waa inuu dhisaa Xukuumadda ku dhisan dimoquraadiyad iyo la xisaabtan dadweyne;
   b) Si waafaqsan Qodobka 50 (b) iyo (f) ee Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyay ujeedada waa in si wax ku ool ah loo siiyaa Xukuumadaha awoodda uruurinta dakhliga hadba heerka Xukuumadeed si waxtar leh ;
   c) Si waafaqsan Qodobka 50 ( c) iyo (g) ee Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyay, ujeedada waa in la helo xiriir ku saleeysan iskaashi iyo istaageerid u dhexeeya Xukuumadaha ka tirsan dawladda federaalka dhexdooda iyo Xukuumadaha dawladaha ka tirsan Federaalka iyo dawladda Federaalka, waa helitaanka midnimo qaran iyo xalinta khilaafaadka si wadahadal iyo dib-u-heshiisiin;
   d) Si waafaqsan Qodobka 50 (d) iyo (e) ee Dastuurka sida KMG ah loo ansixiyay ujeedada sinaanta waxay tahay in qayb kastoo ka tirsan JFS ay ku noolaato adeegyo iyo taageero siman ay ka hesho Xukuumadda Federaalka iyo in kheyraadka iyo dakhliga loo qaybsado dhammaan dalka si caddalad ah;
   e) In ujeedada noqoto sidii loo dhisi lahaa loona adkeeyn lahaa maamullo awood leh oo xubin ka ah Dawladda Federaalka;
   f) In ujeedada noqoto sidii loo kobcin lahaa dhaqaalaha, hormarinta bulshada iyo sare u qaadidda nolosha umadda Soomaaliyeed;
   g) Ujeedada guud waxay tahay xaqiijinta midnimo qaran, amni iyo degenaansho dalka iyo ummadda Soomaaliyeed.
2. Tala kasta oo ay soo gudbiyaan Guddiga Xuduudaha iyo Federalaayeta uusan waafaqsaneyn u jeedooyinka ku xusan Farqadda (1) ee Qodobkan wuxuu noqonayaa mid wax kama jiraan ah oo aan la qaadaneeyn.

## Qodobka 19aad
## Shuruudaha kamid Noqoshada Dawladda Federaalka

1. Shuruudaha looga baahan yahay dawlad cusub oo xubin ka noqonaysa Jamhuuriyadda Federaalaka Soomaaliya waxaa ka mid ah:
   a) In xuduudaheeda si cad u qeexnaadaan iyadoo laga ambaqaadayo xuduudihii goballdii jiray 1991ka hor, sida ku xusan Qodobka 49(5) ee Dastuurka sida KMG loo ansixiyay;
   b) In dhismaheedu ka sameysmo ugu yaraan labo gobol ama ka badan oo ka mid ah goboladii jiray 1991 ka hor ayagoo go'aankooda xor u ah ku midooba, sida ku xusan qodobka 48 (2) iyo 49 (6) ee Dastuurka sida KMG loo ansixiyay;
   c) In xuduudaheeda uu ansixiyo Golaha Shacabka, sida ku xusan qodobka 49 (1) ee Dastuurka sida KMG loo ansixiyay;
   d) In la hubiyo in ay leedahay karti maamuleed oo ay ku maamusho kuna xukunto degaankeeda oo ka tirsan Federaalka;

e) In ay karti u leedahay dakhli uruurin iyo dhaqaale ilaa intii suurtagal ah oo gaarsiin kara isku filnaasho;
f) Kadib markii la hubiyo in ay hanan karto ay xaq u yeelanayso in kheyraadka dabiiciga ah ay u hesho si cadaald ku dhelitiran oo la mid ah dawladaha kale ee cusub oo xubno ka ah Dawladda Federaalka;
g) In tirada dadka degaankeeda deggan la egyahay tiro ilaa heer u dhigma dadka deggan dawladaha cusub oo dhowaan la dhisay xubinna ka ah Federaalka; iyo
h) In aysan yeelan awood dhaqaale iyo mid siyaasadeed ka sareysa oo lagu handdadi kara awoodda Dawladda Federaalka iyo midnimada qaranka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Talo kasta oo Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka soojeediyo oo aan waafaqsaneyn ujeedooyinka iyo shuruudaha ku xusan Farqadda (1) ee Qodobkan waa wax kama jiraan.

## Qodobka 20aad: Habraaca Nidaamka Federaalka
## Habraaca Dhisidda iyo Aqoonsiga Dawladda Xubinta ka ah Federaalka

Qodobkaan wuxuu hagayaa Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka si uu u raaco habraaca lagu dhisaayo nidaamka Federaalka dalka:

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka marka la dhiso ka dib, wuxuu daraasad ku sameynayaa dhammaan gobollada dalka Soomaaliya si uu u ogaado arrimaha soo socda:
   a) Cufnaanta Baaxadda dadka deegaanka ku nool iyo qaab degaaneedkiisa;
   b) Kheyraadka dabiiciga laga helo , dhismooyinka kaabayaasha dhaqaale , awoodiisa maamul iyo arrimaha uu u baahan yahay ;
   c) Waxaa laga hawl gelin karaa siyaasiinta xogogaalka u ah arrimaha deegannada iyo abaabulka qaybaha dawladda xubin ka noqoneysa Federaalka, oo ay ka mid yihiin , kuna koobneyn, maamulada ka jira degmooyinka iyo gobolada, hogaamiye dhaqameedka deegaanka, Haweenka iyo qaybaha kala duwan ee Bulshada;
   d) Iyo wixii kale uu Guddigu u arko inaan looga maarmin dhameystirida dawladnimada sid ku xusan Qodobka 19 ee Sharcigan;
2. Guddigu wuxuu abaabulka iyo qaabaynta dawlda xubin ka noqoneysa Federaalka si balaaran kala tashanaya:
   a) Bulshada degen degaanka;
   b) Siyaasiyiinta gobolka oo ka mid yihiiin maamulka degmada ama gobolka, madax dhaqameedyada, dadka laga tiro badan yahay;
   c) Xukuumadda Federaalka;
   d) Xildhibaanada ka tirsan Baarlamaanka Federaalka;
   e) Iyo in laga qayb geliyo koox kasta ama hay'ad kasta oo loo arko lagama maarmaan si loo xaqiijiyo in si buuxda looga qayb qaato una noqoto hawsha Guddiga mid daahfuran.
3. Guddiga wuxuu abaabulayaa daraasado uu ku sahminayo doorbidka daka gobolada degan oo ay ku kala xushaan hadba nidaamka la haboon in loo qaabeeyo dawlada

xubin ka noqoneysa Federaalka iyo dhismaha maamulada degmooyinka iyo gobolka oo dadweynaha deegaanka la haboon.

4. Guddigu wuxuu fulinayaa hawl galo uu ku fududeeynayo wada hadal heer qaran oo looga wada xaajoodo qaban qaabada iyo qaabeynta dawladaha xubin ka noqonaya Federaalka iyo shir weeyne wada tashi ee heer Qaran oo ay ka soo qayb galayaan wakiilo matala dhamaan gobolada dalka, wuxuuna shirweynahan ka tala bixinayaa habraaca qaab dhismeedka ugu haboon oo si mideeysan loogu dhisi karo dawldaha xubin ka noqonaya Federaalka, deegaandda, Goboladda iyo danaha Qaranka.
5. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxey dersayaan qeybaha bulshada kala duwan, dhaqanka iyo xaaladaha siyaasadeed ee gobol kasta kamid ah Jamhuuriyda Federaalka Soomaaliya wuxuuna horgeynayaa qiimeyntiisa xukuumadda Federaalka iyo maamul-goboleed dhisan si ay talooyinkooda ugu daraan ka hor intaan Baarlamaanka la horgeyn.
6. Guddigu wuxuu Baarlamaanka Federaalka u gudbinayaa talooyinkiisa ku saabsan dhismaha iyo sida ay u sameeysmayaan dawladaha xubin ka noqonaya federaalka , talooyinkaas oo ku saleeysan xogtii uu ka soo ururiyay daraasaadkiisa iyo nidaam u dhexeeya dadka degaanada iyo gobolada kuna dheeli tiran sinaan iyo xaq soor.
7. Baarlamaanka Federaalka marka uu ka baaraandego talooyinka guddiga kadib, wuxuu soo saarayaa sharci lagu dhisaayo laguna aqoonsanaayo dawladaha cusub oo ka mid noqonaaya xubnaha Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 49 (1) ee Dastuurka

## Qodobka 21aad
## Xiriirka ka dhexeeya Guddiga iyo Maamul-goboleedyada jira

1. Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxa la yeelanayaan xirriir wada shaqeyn Maamul Goboleedyada jira ama hay'adaha maamula ee gobolada marka ay sameynayaan soohdimeynta maamul-gobolladka;
2. Maamul-goboleed jira iyo Hay'adaha maamulada gobollada waxay siinayaan Guddigu Xuduudaha iyo Federaaleeynta xog ku saabsan sidii loo soohdimeeyn lahaa maamulgobolladka isla markaana taageero ku siiyaan Guddigu inta suurta galka ah awoodooda dhaqale iyo farsamo;
3. Guddiga Xuduudaha iyo Federaaleeynta wuxuu u soo gudbinayaa deeganada iyo maamul-goboleed ama hay'adaha maamula gobollada qoraal ku saabsan talooyinkiisa iyo fikradihiisa ku aadan soohdimeynta Xuduudaha.

## Cutubka 4aad: Qodobo Qubane ah

### Qodobka 22aad
### Miisaaniyad Sanadeedka

1. Guddigu wuxuu yeelanayaa miisaaniyad u gaar ah oo ka mid ahaaneysa miisaaniyadda guud ee Qaranka si waafaqsan Qod.: 10 (4) ee Dastuurka.
2. Guddigu wuxuu u madaxbanaan yahay maamulidda miisaaniyadda loo qoondeeyay si waafaqsan shuruucda maaliyadda ee maamulka dawlladda.

### Qodobka: 23aad
### Warbixin

1. Gudiga Xuduudaha iyo Federaaleeynta wuxuu soo gudbinayaa warbixno qoraal ah oo ku saabsan gunaanadka xog ururinta hawlihiisa Afartii biloodba mar;
2. Warbixinta Guddiga Xuddudaha iyo Federaaleeynta sida ku xusan Farqadda (1) ee Qodobkan inay ka kooban tahay wixii ku soo kordha arrimaha ku saabsan soohdimeeynta maamul-goboleedyada iyo dhisidda dawladaha xubnaha ka noqonaya Dawlladda Federaalka.

### Qodobka: 24aad
### Xuquuqda iyo Dheefsiinta Xubnaha Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka

1. Xubnaha Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxay xaq u yeelanayaan gunno bileed si waafaqsan habraacyada ay Xukuumada Federaalka Soomaaliya ay ku dhaqanto waxay kaloo Xubnaha Guddiga xaq u leeyihiin gunno safar iyo kharajyo kale ay ku fuliyaan shaqooyin la xiriira xil gudashada iyo hawlaha Guddiga .
2. Xubin kastoo ka mid ah Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka waxay xaq u leedahay hal bil oo fasax ah sanadkiiba.

### Qodobka: 25aad
### Baabi'in

Waxaa la baabi'iyay sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon Karin xeerkan.

### Qodobka: 26aad
### Dhaqan-galka Sharcigan

1. Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka uu ansix yo Baarlamaanka, Madaxweynaha saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah Jamhuuriyada Federaalk